INSAAN



©: Naciima Yuusuf Xuseen.

"Cimrigeennu aad ayaa uu u kooban yahay ,waxa aynu ku qaadanaa xalinta hawlaha dunida,se wakhti aynu kula sheekaysanno nafaheenna ma helno ama kula doodno ama waxa aad u tiro yar dadyowga iyagu qiimeeya la hadalka nafta,hadaba buuggan akhriskiisu waxa uu kaa caawinayaa in aad naftaada u hesho wakhti oo aad dood iyo garawshiyo is weydaarsataan "

" INSAAN , WAXA UU KA MID YAHAY BUUGTA KOR U QAADA DAREENKA DADNIMO EE KUUGU DEEQA FAHAN QOTO DHEER OO KUU IFTIIMIYA MEEQAAMKAAGA"



Naciima Yuusuf Xuseen.

" dhakhtarad wax ka baratay caafimaadka dadweynaha , kalkaaliso iyo qoraa qalinka ku xusta danta dalka iyo dadka "

TUSMO:

Afeef: ……IV

Hibeyn : ……IV

Mahad-naq: ……IV

Hordhac: ……..V

Cutubka 1aad: Xidhiidhka uu Insaan la leeyahay Alle SWT:

……10

Cutubka 2aad : Xidhiidhka uu Insaan la leeyahay Waalid iyo xigto :
……20

Cutubka 3aad: Xidhiidhka uu Insaan la leeyahay Naftiisa :

……30

Cutubka 4aad: Xidhiidhka uu Insaan la leeyahay Asxaabta :

.....44

Cutubka 5aad: Xidhiidhka uu Insaan la leeyahay dadka uu ku daydo: ……48

Cutubka 6aad: Xidhiidhka uu Insaan la leeyahay xawayaanka:

……55

Cutubka 7aad: Xidhiidhka uu Insaan la leeyahay ibnu aadan oo idil:
……60

I. **AFEEF:** Ma gafe waa Alle SWT , wixii aan asiibo Waa Alle mahadii ,wixii aan gafana nafteyda ayaa ay ka ahaatey.

II. **HIBEYN:Buuggan Insaan waxa aan u hibeeyay inta samaha jecel. Waxa aan u hibeeyay Hooyo Samsam Ahmed C.llaahi , Hooyo Shukri Iimaan Muxumed, Hooyo Caasha Cabdi Carwo ,Habo Shukri Axmed C.llaahi .**

III. **MAHAD-NAQ:** Mahad ma guurto ah waxa leh Alle SWT, naxariis iyo nabad gelyo nebi Muxammed korkiisa ha ahaato . Waxa aan u mahad naqayaa Ehel iyo asxaab ba oo aanan abaalkooda gudi karin , Bareyaal xusuus mudan , iyo cid walba oo ka qeyb qaadatay ahaanshaha qofka aan maanta ahay .

- **Mahadnaq gaar ah:**

M.	Maxamed Mahdi Huseen
MM.	Ahmed Mahdi Huseen
MMM.	Cali Mahdi Huseen
MY.	Maxamed Yuusuf Huseen
Y.	Mahad Yuusuf Huseen
YM.	Hodan Yuusuf Huseen
YMM.	Hoodo Yuusuf Huseen
YMMM.	Khadra Yuusuf Huseen
MK.	Mubarak Yuusuf Huseen
K.	Rooda Huseen Cabdi
KM.	C/casiis Mustafe Axmed
KMM.	C/fataax Carab Cabdi
KMMM.	Farxaan Ismaaciil Askar

HORDHAC:

Waqtigii aan qoray buuggii 1aad ee Gurmad ,niyadayda kuma ay jirin in aan buug labaad curin doono ,waxa aan moodayay wixii markaa maankayga deganaa in aan soo gudbiyay ,laakiin intaa ka dib waxa aan ogaaday in qoraalku tar leeyahay oo uu isfurfuro ,maadama ay noloshu balaadhantay oo ay dhinacyo badan leedahay.

Nasiib wanaag waxa noqotay in buuggani uu yahay mid ka hadlaya waxa uu " Insaan" ku yahay "Insaan", iyo sida ay u saameeyaan xidhiidhka uu la leeyahay Alle SWT iyo Caalamka .Xogaha aan kusoo gudbinayo buuggan waxa aad ka dhadhamin doontaa oo ay xambaarsan yihiin habdhaqan Islaam ,taasina faaiido badan baa ay u leedahay akhristaha ,waayo waxa uu ka dhaxlayaa aqoon diini ah.

Hadaba waxa aad tahay Insaan ,abuurkaaga marka aad u dib u raacdo ,waxa aad tahay ciid ,waxa ku damqaysa dhibaatada ,waxa ku dhaawacaysa qodax yar ,laakiin waxa ku kabaya oo ku ilawsiinaya naxariista Alle SWT. Ma tihid mid gooni u nool ee waxa aad xidhiidh joogto ah la leedahay adduunkan kugu xeeran ee deegaan iyo dadba leh , la falgalkaa waxa kaaga soo noqon kara farxad,murugo,horumar ama dhib u dhac IWM.

Xidhiidhka ugu weyn waa ka aad leedahay Alle SWT , haddii uu xooggan yahay noloshaadu waa xasilooni iyo toosnaan ,haddii kalena waa dhibaato iyo jaahwareer ,waayo xaalkan waxa ooman ruuxda oo iimaanka iyo cibaadadu quud u yihiin. Hadaba ,fahanka xidhiidhkan aynu soo xusnay iyo sida uu qofku

wixii dhib u keenaya u xakamayn lahaa ayaa ah lafdhabarta nolol barwaaqo ah.

Maadaama uu yahay " Insaan " waxa Alle SWT abuuray ee ugu sharafta badan oo uu yahay ergayga Alle SWT ka yeelay dhulkan guudkiisa ,haddii uu si fiican u fahmo qiimihiisa ,waxa uu qaban karo , isbedelka uu samayn karo ,waxa uu ka badbaadayaa in uu qiimihiisa garan waayo ,kuna raalli noqdo waxa uu mudan yahay wax ka yar.

Hadaba wada jirka dadka ,wax wada qabsiga iyo wanaagga oo la isla jeclaado ayaa ah jidka horumar lagu gaadhi karo, xanuuno badan oo aan jidhka ku dhicin se ku dhaca nafta ayaa ah kuwa dadka kala fogeeya ,isla markaana dalka ay ku noolyiin ka dhiga mid liiska horumarka kaga jira gadaal.

Buuggani, waxa uu ka kooban yahay 7 cutub oo kala ah xidhiidhka uu qofka ibnu Aadanka ahi la leeyahay :

1. Alle SWT.
2. Waalid iyo Qaraabo.
3. Naftiisa.
4. Asxaabta.
5. Dadkii inaga horeeyay .
6. Mayeedhaanka.
7. Ibnu aadan oo idil.

Qoraalka buuggan waxa igu ilhaamiyay Alle SWT oo aan ugu mahad naqayaa , waa maxsuulkii kasoo baxay sanaddo badan oo

bulsho la dhaqan leh iyo wixii aqoona ee aan ka helay baadhistii xidhiidhka aan soo xusnay.

Inbadan waxa aynu akhrinaa waxyaabo ka baxsan nafaheena ,laakiin waxa lagama maarmaan ah in aad wakhtiyada qaar booqato naftaada,iyo caalamkaaga gudaha si aad isbedel fiican u gaadho.


Xogtani, run ahaantii waa mid aan u baahnaa sanaddo badan ka hor , laakiin waxa ay ii noqon doontaa hage wanaagsan oo aan ku laabto maraksta oo aan u baahdo in aan naftayda wax ka fahmo, isla markaa waxa aan u hibeeyay inta iga da'da yar oo aad ugu baahan iyo qofkasta oo nolosha inta u hadhay raba in uu isbedel wanaagsan ku hogaansho naftiisa.

Alle SWT ha inaga yeelo kuwa hadalka dhagaysta ee kiisa wanagsan raaca.

<u>Ku saabsan buugga iyo qoraaga :</u>

"Naciima Yuusuf Xuseen, waa dhakhtarad wax ka baratay caafimaadka dadweynaha, kalkaaliso iyo qoraa qalinka ku xusta danta dalka iyo dadka"

Waxa la shaaciyay buuggan ,2021.



CUTUBKA 1AAD: XIDHIIDHKA AAD LA LEEDAHAY ALLE SWT

1.1. Hordhac:

Farxad iyo guul waxa lagu gaadhaa xidhiidhka Alle SWT,waa xaqiiq ay lagama maarmaan tahay in aynu aamino, meel looga baxaana ma jirto in la dhaqan galiyo oo la raaco mooyaane.

imisa ayaa laabaha cidhiidhi iyo shaki cusleeyay, quluubta murugo dagtay, noloshana dhibaato iyo caqabado ay dayreen, xidhiidhadu ay yeesheen kala googo' iyo guul darro, ubadku ay waalid inkaar noqdeen?!

Arrimahaa aynu kor kusoo xusnay iyo kuwa la mid ah waa imtixaan lagu eegayo qofkasta oo ay haystaan ,sida ay ula falgalaan ,hadaba sida looga jawaab celinayo haddii uu ka maqnaado xidhiidhka Alle SWT, waxa ay isu bedelayaan kadeed nololeed.

Dunidan ayaa marka aad u fiirsato, waxa aad arkaysaa qof murugaysan maxaa yeelay waxa uu waayay wixii uu doonayay (Xoolo), ku kale oo xaaska iyo ubadku dhibaato ku noqdeen, mid kale oo oo waayay nimcadii caafimaadka

,iyo mid kale oo qalbigiisa holac ka baxayo dulmi ay u gaysteen kuwa dadka dulmiyaa awgii.

Hadaba, xaaladahaas ay ku jiraan dadkaasu ma aha mid ay xal u tahay sabab maaddi ah ,ama talo ay meel ka hayaan,ama sharaf ay leeyihiin, laakiin waxa xal u ah in

ay xusuustaan asalkooda dhoobo uu Alle SWT ku afuufay Ruux, dabeeto ay waydiistaan kaalmo iyo gargaar.

xijir ,29((..... فإذا سوّيته ونفخت فيه من روحي)

Aayadahan aynu xusi doono ,waxa ay ku barayaan in " Ruuxda" waraabkeedu yahay Iimaan iyo Cibaado ,wax maaddi ahna aanay dharginayn.

((وإن من شيء إلّا عندنا خزآئنه

Xjir ,21 .

((وأنّ إلى ربّك المنتهى)) Najm,42.

((ومن أعرض عن ذكري فإنّ له معيشة ضنكا

Daaha ,124.

((ففرّوا إلى الله))،Daariyaat ,50.

● Micnaha aynu ka fahmayno aayadahan waxa weeye:

□ Shay walba in uu Alle SWT leeyahay khasnadihiisa oo aanu jirin shay ka baxaya mulkiga Alle SWT .

□ In aanay jirin ujeeddo la gaadho oo ka danbaysa Rabbi SWT ,garashadiisa, cibaadadiisa ,iyo baryadiisa intaba ,taa micneheedu waxa weeye in qalbigu ku dagayn Alle SWT la xidhiidhkiisa mooyaane .

□ In cidkasta oo ka jeedsata xusuusta Alle SWT, uu u sugnaaday cidhiidhi dhamaan tallaabooyinka uu u qaado nolosha .

□Markasta oo dunidan kugu madoobaato u baxso xaga Alle SWT.

1.2.Qeexid:

◇Xusuus joogto ah oo uu adoonku xasuusanayo Alle SWT,xaalad kasta oo uu ku jiro iyo goob kasta oo uu joogo, farxad,murugo, xilli adag iyo mid barwaaqo ah ,sabool iyo hayn ,sidaa darteed waa mid ka mid ah arrimaha nolosha oo dhan.

قال تعالى: (قل إنّ صـــلاتي ونســـكي ومحياي ومماتي لله ربّ العالمين) الأنعام:162

1.3. Raadka Uu Xidhiidhka Alle SWT Ku Leeyahay Nolosha Ibnu Aadanka:

Adoomada xusuusta xidhiidhka Alle SWT, dhaqanka u leh waxa ay ka dhaxlaan tilmaamaha soo socda:

- Iimaanka oo u siyaada.
- Quluubta oo u xasisha.
- Liibaan labada daarood ah.
- Sugnaan,marka ay musiibooyinku dhacaan.
- Waxa u sahlanaata u hogaansanaanta amarka Alle SWT iyo Ka Rasuulka SCW.
- Waa dad sabir badan, oo aanay gilgilin waxyaabaha dhacayaa.

Iyo tilmaamo kale oo halkan lagusoo koobi karin.

1.4. Siyaabaha Uu Adoonku U Wanaajin Karo Xidhiidhka Alle SWT

Qodobada hoos ku xusan waa kuwo kuu dhawaynaya Rabbi SWT

- Baryada Alle SWT, .الحديث (الدّعاء هو العبادة) Ogsoonow: baryada ,dadku way kugu nacayaan ,laakiin Alle SWT wuu kugu jeclaanayaa kaana raalli noqonayaa .
- Akhriska iyo fahamka iyo dhaqan galinta Qur'aanka Kariimka ah.
- Unoqoshada Alle SWT.
- Barashada cilmiga diiniga ah.
- In aad la rafiiqdo asxaab kuu dhaweeya oo ku xasuusiya Alle SWT.
- In aad ka dheeraato goob kasta oo aad kaga fogaanayso Jidka toosan.
- Salaadaha,Soonka,iyo sadaqada sunnada ah.
- Is dhul dhigga aad isu dhul dhigayso Alle SWT.
- U samofalka iyo u dabacsanaanta dadka. IWM

1.5. Adigu Yaa Aad Tahay? Maxaa Laguu Abuuray? Maxaa Lagu Amray?

Aniga oo ku hadlaya afka ibnu aadan oo idil, mid ila aaminsan iyo mid igu diidanba

,waxa aan ku jawaabay:

_Waxa aan ahay adoon Alle SWT ka abuuray ciid ,kuna afuufay Ruux.

Haddii aad I tidhaa kani waa Aadan, waxa aan ku leeyahay kulligeen miyaynaan Aadan wada ahayn?!

_Waxa lay abuuray cibaadada /u hogaansanaanta Alle SWT .

_Waxa la i amray in aan raaco amarka Alle SWT iyo Nebi SCW .

1.6. Raadka Uu Ku Leeyahay Nolosha Ka Fogaanshaha Alle Swt

Sida ay xusuusta Alle SWT , u leedahay raad la mahadiyo ,ka fogaanshuhu waxa uu leeyay raad aan la mahadin,waxa ka mid ah:

- Albaabada sharka oo uu adoonku wada galo.
- Aduunyo ku dedaal,aakhiro ilaw.
- Qalbiga oo madoobaada.
- Nimcada fahanka oo laga qaado.
- Cibaadada oo uu fududaysto.
- Nolosha oo mugdi noqota .
- Caafimaad ,amni ,iyo nimcooyin badan oo meesha ka baxa.
- ALLE SWT oo kaga aarsada adoonkaas cidhiidhi noloshiisa ka dabra.

1.7. Adoomo Alle SWT Raalli Ka Noqday Iyo Kuwo Uu U Cadhooday:

Qeybtan waxa ay ka warami doontaa dadyowga tusaalaha u noqday u hogaansanaanta iyo ka fogaanshaha Alle SWT.

ADOOMADA RABBI SWT RAALLI KA NOQDAY :

Waxa aynu tusaale u soo qaadanaynaa : Nebi Muxammed,Nebi Ibraahim iyo Nebi Sulayman CS

1. NEBI MUXAMMED SCW:

Erayo oofinaya nebi Muxammed SCW xaqiisa ,laguma soo koobi karayo maqaal,laakiin waxa aynu marwalba ku xasuusan karnaa tilmaamihiisa iyo dhaqankiisii.

Waxa sharaf iyo karaamo ugu filan nebi Muxammed SCW in uu yahay adoonka ugu khayr badan khalqiga ,waa adoonka keliya ee ku guulaystay in aakhiro iyo aduun uu u wada shaqysto ,kuna guulaysto oo uu si wada jira u daadaheeyo,halkaas oo uu kaga tagay aduunkan raad ilaa qiyaamaha jiri doona,aakhirana uu gaadhay liibaan iyo jannooyinka Alle SWT.

Nebi Muxammed_ SCW_ ,waxa uu ahaa adoon dadka iyo mayeedhaanka u dabacsan ,oo waji furan,oo qofna ku celin baahidiisa,ka fal toosan la yimaadda u duceeya,ka qaldamana u tilmaama sidii uu uga toobad keeni lahaa , dulmi ka fog ,diinta u hiiliya, dadkana ku hanuuniya dariiqa toosan.

NAXARIIS IYO NABAD GELYO KORKIISA HA AHAATO.

2. NEBI IBRAAHIM CS:

Nebi Ibraahim CS, waa aabihii nebiyaasha ,waxa uu aamini waayay diintii ay haysteen reerkoodu ee ahayd sanamo la caabudo, waxa uu markasta aaminsanaa in Alle ha aduunkan abuuray uu yahay mid baaqi ah oo aan marna suulayn.Baadhitaanka xaqiiqda ayaa uu ku abaal mariyay Alle SWT, in uu ka mid dhigay adoomadiisa iimaanka laga helay.

Waxa uu aabihii ugu yeedhay kaliyaynta Alle SWT, markii uu u soo joogsan waayay waa uu haajiray kana fogaaday .Carab iyo yahuud waa nebiga ay ka farcameen ,dabkii ay u shideen reerkooda waxa ka badbaadiyay Alle SWT,taasina waa abaalka adoomada Rabbi raalli ka noqday.

NABAD GELYO KORKIISA HA AHAATO.

3. NEBI SULAYMAN CS:

Waxa la idhi waxa dhulka oo dhan xukumay laba mu'min iyo laba gaal : Nebi sulayman , Dulqarnayn ,Nimruud iyo Bukhtansar.Nebi Sulaymaan CS waxa uu ka mid ahaa boqoradii soo xukumay dhulkan ,xilligiisii waxa uu xukumay masaafo aad u balaadhan ,waxa loo sakhiray Jin iyo Insi ,waxa uu ahaa nebi cibaado badan oo baryo badan ,waxa uu waydiistay Alle SWT in uu siiyo talo iyo boqortooyo aan cid kale oo isaga ka danbaysa la siin

doonin ,waxa uu waydiistay Rabbi oo ehel u ah baahidaas oo ku galladaystay .

Qisadiisa waxa aynu ka baranaynaa in la yeesho han wayn ,loona maro dariiqa lagu helayo oo ah in kaalmo la waydiisto Alle SWT.

NABAD GELYO KORKIISA HA AHAATO.

1.8. Adoomo Rabbi SWT U Cadhooday:

Waxa aynu tusaale usoo qaadanaynaa Firwcawn,Ibliis iyo Nimruud.

1. FIRCAWN:

Fircawn waxa uu ka mid ahaa boqoradii soo xukumay dalka masar, qisada nebi Muuse CS iyo Fircawn dhexmartay waa ta ugu badan ee kusoo noqnoqotay Qur'aanka kariima ah. Fircawn xukunkii uu siiyay Alle SWT si xaq ah uma arag laakiin waxa uu u arkay in uu dhulka iyo dadkaba isagu leeyahay ,laakiin gudaha naftiisa waa uu ogaa in uu yahay qof dadka ka mid ah.

Sida uu Alle SWT ehel ugu yahay naxariis badan ayaa uu ehel ugu yahay ciqaab adag, waxa uu ku abaal mariyay Fircawn in uu halaago,xukunkiisiina baabiiyo taasina wax isku tus inoogu filan.

2. IBLIIS:

Waxa la yidhi Ibliis waxa uu ahaa adoon cibaado badan ,waxa ay cibaadadu gaadhsiisay in dhulka laga dalaco oo janada la geeyo.Hadaba, markii Alle SWT uu amray in uu u sujuudo Aadan, waa uu iska wayneeyay ,waxa uuna soo

bandhigay qiyaas aan xaq ahayn oo waxa uu kala fadilay ciid iyo dab,halkaa waxa uu ku noqday aabaha “cunsuriyadda”, oo ka timi fikirkiisa qaldan .

Hoygiisu waa jahanama ,waxa uu ogsoonyahay in uu ku waarayo ,laakiin waxa uu doonayaa cid ugu wehelyeesha.Waa cadowga Alle SWT, waxa uu ballan ku qaaday in uu lumin doono inbadan oo dadka ka mid ah inta cibaadada Rabbi u gaaryeeshay mooyee ,waxa uu sheegay in uu dadka amri doono oo ay bedeli doonaan abuurka Alle SWT, wakhti xaadirkan aynu jooganan waxa dhaboobay hadalkan oo waxa raacay in badan oo dadka ka mid ah ,oo raggii baa iska dhigay dumar ,dumarkiina rag ; qalliino jinsiga ama qayb jidhka ka mid ah lagu bedelayo markii ay galeen ka dib.

Kuwaasu waa baadi aan ogayn in naxariista Alle SWT laga fogeeyay.

Qisada waxa aynu ka faa’iideynaa in xumaan oo dhan uu bilaabay Ibliis ,kala sarayn iyo isla wayniba ,isla markaa dunuubta qaar la dhaafin waayo waxa janada ka soo saaray hadal uu yidhi oo hoygiisa ka dhigay cadaab iyo dab.

3. <u>NIMRUUD:</u>

Nimruud waxa uu ka mid ahaa afartii boqor ee dunida oo dhan xukumay , waxa uu helay xukun waqti dheer jiray iyo maal badan oo uu ku adoonsan jiray dadka uu xukumi jiray, dabeeto muddodaas dheeraatay waxa la sheegaa in

ay ahayad 400 sano ,waxa uu ka dhaxlay isla wayni iyo gaalnimo,waxa uuna sheegtay Ilaahnimo.

Waxa uu la dooday nebi Ibraahim CS, markii uu dabkii ku guban waayay ,waxa uu ku yidhi Maxaa uu Rabbigaa awoodaa?

Ib: Rabbigay ,waxna waa uu dilaa ,waxna waa uu nooleeyaa.

Nim: anba waa aan nooleeyaa ,waanan dilaa,waxa loo keenay laba nin oo jeel ku jiray midna wuu dilay ,midna waa uu sii daayay .

Ib: Haddii aad run sheegayso ,noolee ka aad dishay.

Nim: maxaa kale oo uu awoodaa Rabbigaa?!

Ib: Rabbigay,cadceedda waxa uu ka keenaa beri ,ee adigu ka keen galbeed.

Nim: Jawaab muu celin ,waa ay ku dhagatay jawaabtii ,ileen waa adoon sheegtay awood aanuu lahayn e.

Sida kutubta taariikhdu sheegto ,waxa loosoo diray saddex malag oo faray in uu islaamo ,laakiin waa uu ka diiday ,dabeeto waxa ay fareen in uu soo uruursado xoog iyo ciidan waxa uu hayo ,dabeeto halkaas ayaa ciidankiisii lagu haalaagay oo loo diray xayawaan tamar-yar (kaneeco),waxa kasoo hadhay Nimruud oo keliya oo kaneeco madaxa ka gashay ,waxa la sheegaa in 400 oo sano in uu dib usii noolaa si uu ciqaabta u dhadhamiyo muddo leeg intii uu xukunka hore usoo hayay.

Waxa aynu ka baranaynaa qisadan ,in cidkasta oo xoog sheegata oo iska waynaysa adoon nimada uu ku ciqaabayo Alle SWT ciidan ayna filayn in ay wax kuu gaysan karaan oo ka mid ah ciidamada Ilaahay SWT وما يعلم جنود ربّك إلّا هو)))

U NOQOSHO ALLE U NOQOSHO ALLE



CUTUBKA 2AAD : XIDHIIDHKA UU INSAAN LA LEEYAHAY WAALIDKA IYO XIGTADA.

2.1. Hordhac:

Alle _SWT _waxa uu ku xigsiiyay cibaadadiisa u samafalka waalidka oo kusoo noqnoqotay Qur'aanka Kariim ka ah . Mid la mida waxa uu nebigu SCW ka horaysiiyay Hooyada 3 jeer Aabaha , ha ahaatee,

Labadooduba waxa u sugnaaday xaq aad u wayn. Run ahaantii waxa aynu wada qiraynaa xaqa waalidka iyo meeqaamka ay leeyihiin ,laakiin waxa aynu ugu noqon doonaa xusuus guud.

2.2. Maxaa uu yahay xidhiidhka ka dhaxeeya insaan iyo waalidkii?!

"HOOYO" IYO "AABO" , labadeenna garab ee aynu ku indho dilaacsanay, aragtidoodu waa farxad iyo tamar aynu ku waajahno nolosha ,inaga oo qudhaanjadu ina cuni karto ,awoodeenuna liidato ayaa ay ina soo koriyeen ilaa

aynu noqonay kuwo xoog badan,doodaya oo dunida waxka bedelaaya.

Hooyo waa kalgacal, xanaano, nafhurid, webi biyaha yarayn oo aan gudhin ,waa laabta diiran ee aad madaxa ku tiiriso ee aad uga cabato dhib aad dareemayso, waa mucjiso Alle SWT keenay Caalamka si uu usii jiro iyo hibo aan kaa kala jarayn dheeraadkeeda oo adiga waxba kaaga gadanayn .

Jannadu waxa ay hoostaalaa cagaha hooyada ,waxa ay usoo daashay ,usoo jeeday , u sabirtay siditaankii ay caloosha kugu siday,markii aad dunida timina waxa ay kugu qarqisay naxariis iyo kalgacal.

Waa ubaxa nolosha ,raalideedu waxa ay xaddidaa masiirkaaga ,ducadeeduna waa badbaado,raaxo heli maysid ,ilaa iyada oo dhoollo cadayneysa mooyaane.

Maxaa laga yidhi HOOYO?!

- Buugga ugu wanaagsan ee aan akhriyay.
- Caalamka ma taal barkin ka dabacsan laabta hooyada iyo ubax ka qurux badan afkeeda.
- Mustaqbalka ilmuhu waxa uu ku xidhan yahay hooyadii.
- Ma jirto farxad ka weyn ,farxadda ayku faraxdo hooyad nolosha ubadkeeda oo hagaaga .
- Kalagacalka hooyadu ma duugoobo abid.
- Hooyo waa iftiinka nolosheenna.
  Kusii dar ……

Aabo waa garabka iyo tusaale ha ubadkiisa,oo aan la gudi karayn xaqiisa ,waxa jira nimcooyin aan lagu gadan karin lacag oo laba jeer soo noqon _sida aabaha.

Waa halgan habeen iyo maalin u shaqeeya si uu ubadkiisa baahidooda u daboolo ,dabeeto quluubtooda farxad u gasho .waa tiir iyo dayr kugu xeeran oo kaa ilaaliya dhib oo dhan.

.

MAXAA LAGA YIDHI AABO?!

- Haddii aad doonto in aad ogaato qotada kalgacalku leeyahay ,waxa aad eegtaa qiimaha aabuhu ku leeyahay qalbiga inantiisa.
- Ma jirto farxad ka wayn ,ta uu ku farxo inanku sharafta aabihii, iyo ta uu ku farxo aabuhu guusha inankiisa.
- Hooyo waa kalgacal ,Aabona waa badbaado.
- Tusaalaha 1aad……Aabo.
- Magaciisa oo qudha ayaa ii horseeday guul ,waxa uu ii yahay dhiiri gelin.
  Kusii dar…….

2.3. U sama falka waalidka.

Sama falka waalidku waa in aad hadal iyo fal ba ku raalli geliso ,adiga oo ugu dhawaanaya Alle SWT, samafalka waalidku waxa uu kusoo

ururayaa oo aad ka dhaxlaysaa Alle SWT oo raalli kaa noqda ,liibaan aakhiro iyo mid adduunba .

قال تعالى: ﴿وقضى ربّك ألّا تعبدوا إلّا إيّاه وبالوالدين إحسانا،إمّا يبلغنّ عندك الكبر أحدهما أو كلاهما فلا تقل لهما أف ولا تنهرهما وقل لهما قولا كريما•واخفض لهما جناح الذّل من الرّحمة وقل ربّ ارحمهما كما ربّياني صغيرا﴾ سورة الاسراء ،الآية 23,24

الحديث ﴿ففيهما فجاهد﴾

■ Aayadan ,waxa uu Rabbi SWT inagu waajibiyay in aynaan caabudin Alle mooyee , labada waalidna u sama falno,haddii midkood ama laba doodu ba agtaada ku gaadhaan da', uf haku odhan ,ha dagaalin ,ku dheh hadal wanaagsan, garabkaaga hoos ugu dhig naxriis awgeed (u dhibr sanoow), oo dheh Rabbigayoow u naxariiso sidii ay ii barbaariyeen aniga oo yar)

■ Xadiiskan ,waa hadalkii dhex maray nebi Muxammed SCW iyo saxaabigii doonayay in uu jihaadka galo, waxa uu waydiiyay Rasuulku SCW in ay waalidkii noolyihiin ,waxa uu u sheegay in ay noolyihiin ,dabeeto waxa uu faray Rasuulku SCW in uu iyaga ku jihaado.

Halkaa waxa ka muuqanaya in aanay waxba kaaga dan ahayn hawl kale maadaama waalidkaa daryeel u baahanyihiin!!!!

<u>SIYAABAHA LOOGU SAMA FALAYO:</u>

Ugu sama fal hadal dabacsan, dhibrin, kalgacal, ka dheeroow hadalka adag ee in ay kaa didaan keenaya , ugu yeedh ereyada ay jecelyihiin ,u sheeg hadal anfaca aakhiro iyo adduun ,bar waxa ay kaaga baahnyihiin, adeec waxa ay ku amraan ee aan macsi ahayn,socodka ka danbee, haka horrayn wakhti daruuriya mooyee, marka aad usoo gasho ku fadhiiso idankooda oo ku kac.

Haddii ay kaa horreeyaan ,ugu sama fal duco iyo xidhiidhinta dadkii ay jeclaayeen,haddii ay kugu agwaynaadaanna ha hiifin ee u celi abaalkoodii.

2.4. Waalid Inkaarnimo

MAADAAMA UU YAHAY QODABKANU MID XASAASI AH ,SI TAXADAR LEH U AKHRI, ISQIIMEE, HADDII AAD KU TILMAAMMANTAY ,TOOBADKEEN ,ISBEDEL BAA HORTAADA YAAL OO IS DABO QABATEE.

QEEXID: Waa waalidka oo lagu adkaado ,lagu dhib bato.

Muqaalada waalid inkaarka:

IN QOFKU :

- Ka oohiyo waalidkii ama qalbigooda murugo geliyo.
- Codka kor ugu qaado,hadalka na ku adkeeyo.
- Isticmaalo “uf”marka uu la hadlayo.

- Weji xidhxidhan kula hadlo.
- Indho kulul ku eego.
- Ka caawin waayo shaqooyinka.
- Kala doodo arrimaha oo dhan.
- La tashan waayo.
- Dadka ku hor caayo.
- Sumcadooda hoos u dhigo.
- Ku adkeeyo dalabaadkiisa.
- Ka tago marka ay waynaadaan.
- Ka qajilo la socodkooda marka goobaha laysugu soo baxo.

  Kusii dar…….

  WAXA LAGAGA HORTEGI KARAA SIYAABAHAN SOO SOCDA:
- Aqoon.
- Tarbiyad wanaagsan.
- Waalidka oo waxa ay barayan ilmahooda ku dhaqma .
- Dadyowga waalid inkaarkaa oo laga dheeraado.
- Xaqa waalidka oo la horreysiiyo mar walba.
- In loo feejignaado baahiyaadka iyo dhibaatada hayn karta waalidka.

2.5. Maxaa ay culimadu ka yidhaahdeen tilmaamtan argagaxa leh?!

Culimadu waxa ay ku xeeldheeraadeen baadhista tilmaan kasta oo soo galaysa waalid inkaar ,waxa ay inooga

digeen khatarteeda ,waxa ay inoo cadeeyeen hadallo ay dadku yaraystaan ,laakiin halis ah .

عن يزيد بن الحســين : ﴿ ايجـاب الحجّـة على الوالـدين عقوق﴾ ، لابن الجوزي.

"Waalidkaa oo aad xujada ku oogtaa waa waalid inkaar nimo"

Taa micneheedu waxa weeye : In aad waalidkaa ku cadayso hadalku sida uu yahay, oo aad is biddo sarrayn iyo aftahan nimo ayaa iyadna ah tilmaantaa aynu soo sheegnay.

!!

2.6. Xigto:

Waa ayo xigtada xaq u leh in la xidhiidhiyo ?

Hooyo ,aabo, ayey,awoow, ubadkaaga iyo ubadkooda,walaalahaa iyo ubadkooda,adeer,eddo iyo ubadkooda ,abti,habryar iyo ubadkooda intuba waa qaraabo.

Hadaba ,waxa aan mawduucan usoo qaatay ,waxa aan dib ugu fiirsaday aayado badan ,iyo xadiisyo xusaya xigtada ,xidhiidhkooda iyo ciqaabta ka danbaysa jiritaanka xidhiidhkaas.

فـال تعـالى: ﴿ فهل عســيتم إن تولّيتم أن تفســدوا في الارض وتقطّعوا أرحامكم ،أولئك الّذين لعنهم الله فأصّــمهم وأعمى أبصــارهم ﴾ ﴿ محمّد_ الآية 22,23

﴿من ســرّه أن يبســط له في رزقه، وينســأ له في أثره ،قليصــل رحمه الحديث ﴾

- Aayadan Qur’aanka ah waxa kasii horeeyay aayado kale oo ka waramayay dadka u hogaansami waayay amarka Alle , waxa ay keenaysaa arrintaasuna in dhulka la fasahaadiyo ,xigtadana la jaro ,ciqaabteeduna noqonayso Lacnad iyo in laga indho tiro ,lagana dhego xidho hanuunka .
- Xadiisku waxa uu ina amray in ruuxii jecel in risiqa loo fidiyo ,cimrigana loo dheereeyo uu xidhiidhiyo xigtadiisa .

2.7. Sidee Loo Xidhiidhinayaa Xigtada:

Xidhiidhintaasu waa mid ka mid ah arimaha ugu waawayn ee ay ina fartay diinteenna suubani.
Inbadan oo dadka ka mid ahi ma dareensana ,muhiimna uma arkaan mawduucan xasaasiga ah .Runtii in cilmiga dib loogu noqdo oo wax badan la akhriyo waxa ay keenaysaa in la noqdo xogogaal oo laga badbaado haliso badan.

Hoos waxa ku xusan siyaabaha loo xidhiidhiyo xigtada :

- Haddii ay ku jaraan xidhiidhi.
- Sadaqada waxa xaq u leh xigtada.
- U ducee kooda dhibaataysan.

- Ku xidhiidhi maal aad siiso, booqasho iyo hawl aad wax kala qabato.
- Waano iyo talo ayay kugu leeyihiin.
- Ku xidhiidhi taleefan/qoraal/ IWM.
- Khayrka oo aad farto.
- Xallinta khilaafaadkooda.
- Ku waani dadka kale in ay xidhiidhiyaan xigtadooda.





CUTUBKA SAAD : XIDHIIDHKA UU INSAAN LA LEEYAHAY NAFTIISA

3.1. Hordhac:

Loolanka uu kula jiro qofku naftiisa ,waa loolan laba dhinac leh : mid taban iyo mid togan .

Loolanka togan: waa ka uu yahay xidhiidhka ka dhaxeeya qofka iyo naftiisu mid keli ah oo midaysan ,waayo naftiisu waa isla isaga , waxa uu ku dedaalayaa waxyaabaha fiican oo dhan ,badbaado iyo halaagba waxa uu u arkaa in ay wada huran tahay oo aanay marna kala hadhayn.

INSAAN IYO NAFTIISA
ADIGU IYADA AYAA AAD TAHAY ,IYADUNA WAA ADIGA.
Ujeedada la doonayaa waxa weeye in aad tarbiyadayso ,edbiso,ilaaliso, isla markaana aad la xisaabtanto si aanay uga habaabin jidka toosan.

Loolanka taban:
Waa ka uu yahay xidhiidhka ka dhaxeeya ruuxa iyo naftiisa, kala carar iyo iska hor imaad ,tilmaantiisu waa nacayb, colaad, xiqdi, yaraysi ,halkan naftu waxa ay dulminaysaa Insaan.

Hadaba ,nafuhu sida ku xusan Qur'aanka waa 3 : mid xasiloon, mid is canaanata iyo mid xumaanta farta.Ta la doonayo in aynu gaadhno waxa weeye darajada ugu sarraysa ee ah nafta xasiloon ee ku noqonaysa Rabbi SWT iyada oo raali ah,raalina laga yahay .
﴿يآأيّتها النّفس المطمئنّة ،ارجعي إلى ربّك راضــيّة مرضــيّة﴾ ســورة الفجر _الآية 27,28

3.2. Qeexid :

Loolanka dhex yaal Insaan ,waxa uu ka kooban yahay oo dhan jidh , ruux, caqli iyo doonitaan intaba .
Kama koobnid walax keliya ,laakiin waxa aad ka kooban tahay waxyaabo kala duwan oo is dhamaystiraya :
Biyo ……Ciid
Jidh……..Ruux
Naf ……..Caqli

Hiigsi,doonitaan, shahwad,ididiilo iyo qiimo , intaas oo dhan waxa ay samysaa qof dhamaystiran.

3.3. Qaabka Uu Insaan Ula Xidhiidho Naftiisa:

Hawlaha nolol maalmeedku waxa ay kala dhex galaan qofka iyo xidhiidhka uu la leeyahay naftiisa ,hadaba waqtiga u horeeya ee uu helo wakhti waxa si toos ah u bilaabma xidhiidhkaas ,kaasoo ka xeel dheer isla hadalka goo gooska ah ee hawlaha dhexdooda dhaca.
Culimada cilmi nafsigu waxa ay marwalba inagu waaniyaan in aynu wanaajinno aragtideenna aynu ka haysanno dunida inagu xeeran oo ka dhalata fikirkeenna oo ah xidhiidhka aynu la leenahay nafteenna.

Jawaabaha ka muuqanaya wejigeennu ,waxa ay toos uga soo baxayaan gudaheenna taas oo ah dareenka iyo fikirku sida uu yahay.

Hadaba , waxa ka muuqda wejigeenna waxa aynu ku haysanno gudaheenna,haday tahay kalgacal, nacayb, farxad, murugo, degenaan,warwar, xanuun iyo caafimaad.
~ Ka waran ,dadka,dalka,dunida sidan aad u aragto waa fikirkaaga ,laga yaabaa in uu sax yahay iyo in aanu sax ahayn labadaba! Waxyaabaha aynu ka baqanno waa fikir ,inbadan oo ka mid ah baqdintaas waa mala awaal aanay waxba ka jirin oo caqabad ku noqda qofka wadadiisa uu guusha u marayo.

Dadka qaar ayaa waxa ay aaminsan yihiin in meelaha sare ay leeyihiin dad gaar ahi ,oo aanay iyagu gaadhi karin

……. Waa hab fikir uun …. Waa baqdin ….. mala awaal ah !!!!!!!
In uu qofku la yimaaddo falal fiican/ fiicnayn waa natiijada aragtidiisa.

In mid inaga mid ahi yahay qani, dadka anfaca, oo aduunyadiisa u shaqaysta ,midna uu yahay mid meelahaa iska fadhiya ,kala duwanaantaas waxa keentay aqoonta ka dib ,hab fikir kala duwan.In uu yahay qof inaga mid ahi mid dadka wada jecel oo marka uu arko qof guulaystay raynrayn dareema ,mid kalena uu yahay mid horumarku farax gelin ,waxa keenay hab fikir kala duwan.

Hoos waxa ku xusan waqtiyada uu xidhiidhka naftu xooggan yahay :

- Xilliga cibaadada iyo u dhawaanshaha Alle SWT ,waxa uu ruuxu galayaa xaalad degen oo uu xasuusanayo xaqiiqdiisa addoonimo.taasna waxa uu ka dhaxlaa in uu khayrka jeclaado ,xumaan oo dhanna ka fogaado .Waa xaalad niyaddu saafi noqoto haddii uu la yimaaddo khushuuc.
- Waqtiyada uu ruuxu hawl adduun ka faro baxo ee uu ku keliyoobo naftiisa waxa dhaca xidhiidh aad cajiib u ah ,waxa soo hormara waxyaabaha uu fuliyay oo u noqda farxad ,iyo dhacdooyinka damqaya oo haddii aanuu soo afjarin ku keenta murug aad u badan oo uu la noolaado.
  Waxa uu u fiirsadaa isbedelka ku yimi ,tilmaamo ayaa uu ka tagaa,kuwo kalena waxa uu ku daraa dhaqankiisa.

waa aamusnaan, baraarug,nasasho, xirfad,xusuus,tijaabo,ilaalo nafta ah ,wakhti xaadirka oo aad noolaanayso.Waxa kale oo uu yahay waqti lagu saxo qaladyo badan ,oo lagu bedelo geeddiga noloshu jihada uu u socdo.Waxa aynu ku sifaynaa waxyeelada inaga soo gaadha dhacdooyinka maalin laha ah ,oo aynu kaga saarnaa nafaheenna wixii ina damqaya. Ugu danbayn waxa weeye la sheekaysiga aynu la leenahay nafaheenna .

3.4. Sidee Ayaa Aad U Noqon Kartaa Qof Naftiisa Heshiis La Ah?

Waxa uu “Stephen Covey “ ,ku wariyay buuggiisa “ The 7 Habits Of Highly Effective People”- 7 bada caado ee dad saameynta wax u oolka ah leh - sheeko dhex martay nin la raacay bas oo watay caruur kolba kursi ku boodayay oo qaylinayay , muu u adkaysan Stephen ee waxa uu ku yidhi ninkii “naga qabo ciyaalkaaga”!

Ninkii waxa uu ugu jawaabay ,” iga ralli ahoow ,hooyadood ayaa cusbitaalka ku dhimatay inyar ka hor ,dabeeto naxdintii umaan fiirsan waxa ay samaynayaan”!!!!!

Markaa Covey ,wuu garan waayay wax uu sameeyo ,waxa uu jeclaystay in uu sugi lahaa waxyar inta aanuu ku xukumin xaaladaas.

Sida uu sameeyay Covey ,waa arin iska caadi ah oo dabeecada insaanka ah , oo mid inaga mid ahi marka uu arko wax uu diido, waxa uu la degdegaa xukunkiisa.

Mid kasta oo inaga mid ahi waxa uu sidaa qaadi yar oo aan daalin oo ku degdega xukunka ,waa qaadi aanay magacaabin maxkamaddu oo aan baran qaanuunka ,laakiin ka dhashay loolanka uu qofku kula jiro naftiisa ,dabeeto qaadigaasu waxa uu diidanyahay in uu qofku la heshiiyo naftiisa.

Si aad ula heshiiso dadka kale waa in aad ula heshiiso naftaada, oo aad aqbasho ceebahaaga/meelahaad ku liidato dhamaantood, iyo gafafkaaga adiga oon xukumin oo aan kala saarsaarin. Naftaada ha dirqin , ha yaraysan, ha xaqirin, sida aad u gasho ayaa ay kuu galaysaa.

Naftaada oo aad heshiis la tahay waxa weeye in aad aqbasho dadka kale waxa aad ku kala duwan tihiin iyo iska hor imaadkiina , ma aha waa aad jeceshay ,laakiin waxa weeye ma necbid!

Taasi waxa ay kuu fududaynaysaa in si dhib yar aad uga noqoto gafafka aad galayso adiga oo naftaada dhib soo gaadhsiin ,isla markaana isbedel u samayn karto.

Nolol ta ugu adag adiga oo ku nool ayaa aad dareemi kartaa raynrayn ,waa marka aad u aragtid dhibkasta in ay tahay nimco wax ku baraysa ,waxna kaa bedelaysa.In aad naftaada la heshiiso micnaheedu waxa weeye in aad ilawdo taariikhdaada hore ,oo aad bilawdo taariikh cusub oo aad yeelato riyo kuna bilawdo riyadaas akhris. Qof ka

naftiisa heshiis la ahi waxa uu u eegyahay webiga ku shuba biyihiisa badda ,baddu macaanayn mayso biyaha ,laakiin shaqadiisu waa in uu sii waraabiyo dhulka uu sii marayo.

TALLAABOOYINKA LA HESHIISKA NAFTA:

1. U fiirso qaabka aad ula hadlayso naftaada.
2. U sheeg naftaada in hadalkaaga adag dhibayo.
3. Nafta ha canaanan ee dhis.
4. U dabacsanoow nafta.
5. U sheeg nafta in canaantu tahay warwer iyo dhibaato.
6. Ogow, dadka oo dhami way la noolyihiin dhibaato.
7. Isbedelku waa macquul.
8. Ka fikir mawqifka adagi dibta uu leeyahay.
9. Saamax naftaada.
10. Uga sheekee nafta in ay is aqbasho.

3.5.Horumarka Nafta:

Waxa lagu qeexaa dedaalka uu qofku ku jiro si uu u noqdo ka ugu wanaagsan , isaga oo xoojinaya awoodihiisa ,isla markaana kobcinaya meelaha uu ku liito.

Marka uu qofku is horumariyo waxa kor u kacda meeqaamka uu ku leeyahay bulshada dhexdeeda iyo goobaha shaqada.

In aad naftaada qadarisaa ,waxa ay sheegaysaa in aad dareensantahay qiimahaaga iyo waxa aad qaban karto ,taasina waxa ay sal u tahay cidda aad tahay.

Qadarinta nafta waxa laga dhaxlaa qoyska oo ilmuhu waxa uu wax badan ka qaataa sida ay qoyskoodu u arkaan , intaa kedibna asxaabta dhexdooda ,sidaa usii wad ilaa uu dhex galayo qeybaha bulshada ee kala duwan.

QAABKA NAFTA LOO HORUMARIYO:

- Aqoon = xirfad in aad yeelato.
- Ha joojin aqoon raadis.
- Ujeeddo yeelo.
- Waxyaabo cusub baro.
- Ha noqon biyo fadhiya, dhaqdhaqaaq oo isbedel. (Aqoon iyo xirfado kasbo).
- U habee arrimuhu sida ay u kala horeeyaan.
- Waxa aad barato ku shaqee.
- Dhanka fiican wax ka eeg.
- Horumarku waxa uu ka bilaabmaa gudaha.
- Isu dheelli tir arrimaha.
- Dhis naftaada.

3.6. Maxaa Ku Keena Qofka In Uu Is Horumariyo?

Kalsoonidu waa sababta ku hogaamisa qofka in uu aamino naftiisa oo uu horumariyo ,waa dareen uu ka qabo naftiisa taas oo uu hadli karo, waxna qaban karo baqasho la'aan isaga oo aan tix galinayn waxa dadka kasoo horjeedaa ay ka aaminsanyihiin. Laf ahaantii ayaa uu u dhaqmayaa ,go'aanna u qaadanayaa,maxaa yeelay waxa uu ogayahay in Alle SWT dhexdhigay ruux kasta tilmaan ka soocaysa dadka kale ,dabeeto waxa uu baadhayaa tilmaantaas si uu ugu hagar baxo.

Noocyada kalsoonida:

Kalsooni buuxda: waxa uu awood u leeyahay ruuxu in uu xalliyo mushkilad kasta oo soo waajahda.

Kalsooni xaddidan: waa ta soo muuqata waqtiyo gaara oo lagu daadaheeyo dhacdooyin gaar ah.

Hoos Waxa Ku Xusan Waxyaabaha Kor U Qaada Kaalsoonida:

- Aamin in aad dunida xikmad u joogto.
- Is qadari.
- Tijaabooyin cusub samee.
- Ka qeyb qaado waxqabadyada .
- Ka fogoow macasi.
- Dhanka fiican wax ka eeg.

3.7. Maxaa Hoos U Dhiga Kalsoonida Uu Insaanku Ka Qabo Naftiisa:

Run ahaantii ma jiro qof is neceb oo is yaraystaa , laakiin dhacdooyinka dunidu waxa ay kor qaadaan qof ,halka ay mid kalena hoos u dhigaan ,waalid aan ogayn saamaynta hadalkiisa ,macalin aan islahayn wax dhib, Saaxiib aan daacad ahayn, walaal hadalka kugu adkeeya, nasiib ka oo xumaada aad aduunka ku leedahay ,intaas oo dhami waxa ay keeni karaan in ay kalsoonidu ka dhimato maankaaga.

Waxa iyana keeni karta ,hab fikirka ….,dadka oo sabab jirta uun awgeed aan u aaminin awoodihiisa ,laakiin wakhtiga ugu dhow ee uu helo wacyi gelin iyo xog badan

ayaa waxa uu noqon karaa ,mid dalkiisa iyo dadkiisaba wax tara oo nolosha wax ku biiriya .

Ma isku daydaa in aad qof dhib ka haysato kalsoonida in aad caawiso oo aad ku qanciso in uu daaqadaha furto si uu iftiinku usoo galo?!

Calaamadaha uu leeyaahay qofka aan isku kalsoonayn:

- Had iyo jeer waxa uu sheegaa sababta ku kaliftay qaldkiisa.
  - Waxa uu muhiimad siiyaa fal celinta dadka kale.
  - Waxa uu ku nool yahay wax aan dantiisa ahayn /khiyaali.
  - Mar kasta waxa uu doonaa in wax waliba u dhamaystirnaadaan .
  - Aamusnaan iyo is ururin.
  - IWM

MAXAA SABABAY?!

- Niyad jab.
- Arin uu ku guul darraystay .
- Xasilooni la’aan.



CUTUBKA 4AAD: XIDHIIDHKA UU INSAANKU LA LEEYAHAY ASXAABTA

4.1. HORDHAC:

Saaxiib ku waa quruxda nolosha, waa wajiga kaa qosliya xaalad kasta oo aad ku sugantahay.

Waa taageero,kaalmo, waa qasnad aan ka dhamaan cidda garanaysa qiimahaas ee ilaalisa.

Waa wehel ku kaba marka aad niyad jabto, ku taageera marka aad murugooto ,kuna xoojiya marka aad tamar darrayso.

Saaxiib tinimadu waa xidhiidh ka madax banaan maslaxad ,asxaabtuna waxa ay ku wadaagaan farxadda , iska na yareeyaan murugta. Waxa lagu tiriyaa in ay tahay mid ka mid ah xidhiidhada ugu qiimaha badan ee dhex mara ibnu aadanka.Runtii ,waa ay adagtay noloshu haddii uu ka maqan yahay saaxiib kula wadaagaa.

4.2. Qeexid :

Waxa lagu qeexaa in ay tahay xidhiidh dadnimo oo isku xidha 2 ama in kabadan oo ku dhisan ixtiraam la is waydaarsanayo ,kalgacal ,run sheeg, aaminaad. Waxa isku keena asxaabta waxyaabaha ay wadaagaan iyo goobaha lagu kulmo.

Hadaba, dadka aynu ku tirino asxaab waxa ay u qaybsamaan saddex: dadka aad ku kulantaan goobaha waxbarashada iyo meel kasta oo lagu kulmo ,dadka aad ka doorato tiradaa badan ee aad

la rafiiqdo ,iyo dadka aad kasii doorato tiradan yar oo lagu tilmaamo asxaab aad kuugu dhow.

Maxaa laga yidhi saaxiibtinimo?!

- Waa dhul lagu beeray kalgacal oo lagu waraabiyay naxariis.
- Waa geed, xididadiisu yihiin oofin,caleemahiisuna naxariis,midhihiisuna yihiin iska war hayn.
- Waa layman is garab socda oo aan is jiidhin ilaa ay maslaxad soo muuqato.
- Waa dalaayad,baahidaad u qabtaa badanayso markasta oo roobku sii bato.

4.3. Saaxiib In Aad Heshaa Ma Risiq Baa Mise Waa Aad U Hawl Geli Kartaa?!

Anigu waxa aan aaminsanahay in helitaan kaasu uu yahay risiq uu Alle SWT kugu arsaaqo ,sababta oo ah arrimaha nolosha oo dhan ,waxa la yidhi in aad waydo baahi waxa keena baadhitaanka faraha badan ," cidkasta oo aad doontaana kuma doonto,cid kasta oo aad gaar u noqotaana ,gaar kuuma noqoto cid kasta oo aad soo dhaweysataana kuma dhaweysato, cid kasta oo aad jeclaataana kuma jeclaato"_ Imaam al-Shaafici.

Waxa la filayaa in asxaabta aad kula dhaqanto xeerar u yaal xidhiidhkaas,ay sidaa si leeg kuula dhaqmayaan ,kuu hiilinayaan,kuna garab istaagayaan ,laakiin 100% lama odhan karo waxa ay kuu noqon karaan daacad.

Anigu , waxa aan aaminsanahay laba qof oo isku si' u doonaya xidhiidh saaxiibnimo,oo quluubtoodu isu dirayaan farriimo isku mid ah ayaa noqon kara saaxiib, haddi la helo waa guul.

4.4. Maxaa Laga Yidhi Saaxiibka Dhabta Ah ?

- Waxa adag in la helo iyo in laga tago,waxa suuro gal ahayn in laga fogaado.
- Saaxiibka dhabta ahi waa ka xagaaga usoo kaca marka ay dadka oo dhami kaa fogaadaan.
- Waa ka marka aad la joogto aad tahay ,sidii oo aad tahay keligaa.
- Waa ka aqbala cudur daar kaaga ee kaa saamaxa gafkaaga ee buuxiya meeshaada marka aad maqan tahay.
- Waa xiddigo aadan arag mar walba ,laakiin aad ogtahay in ay joogaan oo muuqdamarka aad gasho mugdi.
- Waa kuwa kaa malysta male wanagsan ee kuu daydaya cudur daar.
- Waa ka kuu ilaaliya maalkaaga ,ubadkaaga, ehelkaaga iyo sharaftaada.

4.5. Sida Loo Kasbado Asxaabta:

Mar kasta xusuusnow in aad la dhaqmayso dad leh fikir , caadifad ,dareen oo ay ka buuxdo kibir,isla wayni iyo waxyaabo naftu doonto. Isku day in aad xoogga saarto tilmaanta fiican ee ay dadku leeyihiin oo ku qadari ,waxa ay ku xasuusnaan doonaan muddo dheer.

6 HAB OO LAGU KASBADO ASXAABTA AYAA HOOS KU XUSAN:

- U muuji dadka in ay agtaada muhiim ka yihiin.
- Dhoolo cadee.
- Ugu yeedh dadka magacyo ay jecelyihiin.
- Waydii dadka su'aal aad ogtahay in ay ku farxayaan ka jawaab keeda.
- Ka sheekee waxyaabo farax geliya.
- Dhamaanteen, waxa aynu jecelnahay in inala qadariyo, qadari dadka kale oo dareensii qiimahooda.

> Ogow: Tilmaamahan aynu soo sheegnay dadka qaar waa ay leeyihiin oo waa ay inagula dhaqmaan ,laakiin in la barto ayaa ah daruuri.

4.6. Tartanka Dhex Mara Asxaabta.

Tartanka dhex mara asxaabtu ,waa laba:

Tartan aakhiro :

waxa loo baratamayaa raali gelinta Alle SWT, cibaadada iyo gelitaanka janada. Waa tartankii dhex maray nebi Munammed SCW asaxaabtiisa ,waana tartanka sharafta leh .

Tartan adduunyo:

Waxa loo baratamayaa danaha adduunyo ,waxa uu keenaa colaad ,waana tartan soo jireen ah oo ka dhaxeeyay dadka isla markaana jiri doona.

Hadaba , waxa ugu wanaagsan in uu qofku la tartamo naftiisa , oo uu is barbardhigo wakhtigii tagay iyo kan imika farqiga u dhaxeeya ,oo uu kobciyo meelaha uu ku liito ,sii joogteeyana tallaabooyinka suuban ee uu qaaday , taas ayaa ah ta ugu fiican oo kaaga qiimo badan la hirdanka dad kale oo kugu keeni kara isku buuq iyo cidhiidhi nafeed.

“Qaanuunkan waa kii aan raacay noloshayda oo aan ka dhaxlay degenaansho iyo horumar joogto ah”.

Hadaba ,haddii ay asxaabtu raacaan nidaamka is dhamaystirka oo ah In ruux walba uu dantiisa wato ,la isugu yimaaddo caawin iyo is toosin ,mid kasta oo ka mid ahna lagu tixgelinayo rejo diisa iyo dedaalkiisa ayaa ah dariiq guul lagu gaadhi karo.

Laakiin ,haddii midba midka kale ka dhigto hadaf uu tooganayo meelna la gaadhi maayo,laysna dhamystiri maayo.

عن أبي هريرة_ رضـي الله عنه_ قال:قال رسـول الله _صلّى الله عليه وسلّم : لا تحاسدوا ،ولا تناجشوا ،ولا تباغضـوا ولا تدابروا ولا بيع بعضـكم على بيع بعض ،وكونوا عبـاد الله إخوانـا ،المسـلم أخو المسـلم ،لا يظلمه،ولا يخذله،ولا يحقره، التّقوى ها هنا _ويشـير إلى صـدره ثلاث مرّات_ ،بحسـب امرئ من الشّـر أن يحقر أخاه المسلم ،

كـل الـمســـلـم عـلـى الـمســـلـم حـرام: دمّـه ،ومالـه،وعرضـه﴾ رواه مسلم.

Xadiiskan waxa Rasuulku SCW ,ina barayaa casharo faro badan oo habla dhaqanka wax badan inooga iftiiminaya:

- Ha is xaasidina.
- Adiga oo aan wax iibsanayn ,in aad ku dalacdo lacagta iibka qofka wax iibsanaya adoo uga jeeda in aad u kordhiso ka wax iibinaya,ama ku dhibaataynaya ka wax iibsanaya _ ficilkan ayaa uu rasuulku SCW inaga reebay.
- Ha la imanina wax is nacayb keenaya sida iskudir iyo xan.
- Hala imanina wixii dhibaato ah ee keenaya inaa shar isu maleegtaan.
- Qof wax iibinaya , in aad ka wax ka iibsanaya ka leexiso oo aad tidhaa anaa haya agab ka wanagsan oo ka jaban _ Ficilkaas ayaa inala ga reebay.
- Ahaada walaalo Ilaahay dhan kasta.
- Muslimku waa walaalka muslimka ,ma dulmiyayo,ma hoojinayo,ma yaraysanayo, Alla ka cabsigu waxa xaga qalbiga _ haddii qalbigu hagaago dhaqanku wuu hagaagaya ,haddii uu xumaadana dhaqankuna wuu xumaanayaa.
- Qofka waxa shar ugu filan in uu yaraysto walaalkiisa muslimka ah.
- Dhiiga qof ka muslimka ah ,maalkiisa iyo sharaftiisu waa ka xaaraan walaalkiisa kale.

4.7. Saamaynta Ay Asxaabtu Ku Leeyihiin Nolosha Insaanka

Samayntu waxa ay noqonaysaa labadan hoos ku xusan mid ka mid ah uun:

- Haddii, asxaabtu daacad isu yihiin oo ay ka go'an tahay in ay ayaamaha dunidan ka wada gudbaan oo ay is dhamaystiraan waxa ay gaadhaan guul, waxa ayna u gudbiyaan ubadkooda qaabkaa nololeed.
- Haddii, wanaag la isu hurayn, la is qadarinayn, la wada halgamayn, la is dhiiri gelinayn, waxa lagu kala dhuuntaa cidhifyada dunida, wax qabad dunida anfacana haba sheegin.





CUTUBKA 5AAD : XIDHIIDHKA UU INSAANKU LA LEEYAHAY DADKA UU KU DAYDO.

5.1. Hordhac:

Insaanku ,waxa uu xidhiidh la leeyahay dadka uu la fal galayo ee tusaale uu ku daydo u ah , waxa ugu horreeya hooyo , oo mudada uu caloosha ku jiro iyo dhalashda ka dibba uu la qabsanayo ,kuna raadoobayo caalamkeeda . Hooyadu waa albaabka uu ilmaha yari ka galayo caalamkan, halkaas oo uu ku tiirsanyahay hooyadii wax kasta uu u baahanyay, xanaano,quudin, ilaalin,iyo af-barid intaba.

Sidaa awgeed ,waa in ay hooyadu ogtahay ,qiimaheeda iyo masuuliyadda ka saaran ubadkeeda, qorshe na uga yaal barbaarinta ubadkeeda.

Waxa loo gudbayaa intaa kadib aabaha iyo xubnaha kale ee qoyska oo uu ka kasbanayo ilmaha yari dhaqamo faro badan.

Wakhti xaadirkan , tiknoolajiyadda ayaa ka mid noqotay nolol maalmeedkeenna halkaas, oo aan laga maarmayn marnaba, laakiin waxa haboon in laga xakameeyo la qabsashada ay ubadku ka qaadanayan falal ka weyn da' dooda oo dib u dhigi karta la jaanqaadka dunida. Waa dhibaato runtii marka aynu aragno ilmo yar oo socod barad ah oo hadana la qabsaday "mobile " oo musaasadda ba ka jecel !!

Arintaana ,waxa lagu bedeli karaa iyada oo loo saaro marar badan dabiicada, iyo in ay ku ciyaaraan agabka caruurta loogu talo galay .Agabkan laftooda laga daayo kuwa ilmaha maskaxdiisa baraya in uu wax dilo.

Intaa ,haddii aynu kaga gudubno bilawga dunidan ,waxa aynu u gudbi doonaa dadyowga aynu ka dhaxalno tilmaamo ee tusaale inoo ah ,kuwaas oo noolaa wakhtiyo tagay ama nool wakhti xaadir kan .

5.2. Nebiyo CS:

Dhammaan nebiyada uu doortay Alle SWT, waxa ay yihiin tusaale nool oo aynu ka dhaxalno sabir ,aqoon iyo tilmaamo fiican oo badan. Waxa ay la kulmeen dhibaato inta ugu badan ee dad la kulmaan oo waxa ay waayi jireen ehel, caafimaad, iyo waddan intaba.Waxa ay kaalmo waydiisanayeen Rabbi SWT oo kor u qaaday meeqaamkooda.

“ Qofka ay ku yaraadaan imtixaanadu ,waxa ku yaraaday dhaxalkii nebiyada”.Naxariis iyo nabad gelyo korkooda ha ahaato, waxa ay ahaayeen adoomada Alle SWT kuwa ugu khayrka badan, ugu na dhibaato badan ,oo sabir ku gaadhay darajooyin sare ,magacooduna jiri doono inta dunidu jirto.

5.3. Asxaabtii Rasuulka SCW:

Asxaabtii Rasuulku waxa ay ahaayeen dad uu Alle SWT u doortay in ay la rafiiqaan nebi Muxammed SCW ,sida uu diinta ugu doortay nebi Muxammed SCW, waxa ay ahaayeen dad ku tilmaaman insaan nimo oo hiil iyo hooba la garab istaagay nebi Muxammed SCW.

Cid lagu misaalo ,hiilintii ay u hiiliyeen Diinta Islaamka iyo laab xaadhnaantii ay ku walaaloobeen ma jirto.Dad noocaas ah na waxa la helaa marka ay dadku diyaar u yihiin in ay isbedelaan ,iyaga oo tixgelinayn xilalka ay hayaan,qabiilada ay kasoo jeedaan, oo isu dhul dhigaya cilmiga xaqqa ah ee ka imi xagga Rabbi SWT.Waxa ay gaadheen darajada ugu sarraysa ee la gaadho Islaamnimo,wanaag, isu hurid iyo qayrkaa oo aad la jeclaato waxa aad naftaada la jeceshay.Alle SWT, raalli haka noqdo,waxa ay yihiin tusaale nool oo khayrka inagu hogaansha.

5.4. Dadka Saamayn toos ah kugu leh:

Wanaaggu waa tilmaan soo jiidata quluubta dadka.

Dad aynaan la kulmin oo dunida ku nool, ama noolaa wakhti hore ayaa aynu ku baranaa cilmi ay qoreen, dardaaran ay ka tageen IWM oo soo jiita ruuxdeenna ,taa

na waxa sabab u ah wanaagga inagu abuuran ee asalka inoo ah. Hadaba ,dadka doortay in ay tusaale noqdaan oo noloshoodu ina barto in weli dunidu khayr ku sugan tahay ,waxa ay yihiin iftiin baxaya oo ay soo eegtaan dadyowga ay tusaalaha u yihiin.

Noloshayda waxa hage u ahaa aabahay Dr.X. Yuusuf Xuseen , oo sheekooyin aan badnayn oo aan ka helay ehelka ayaa tobanaan sano u ahaa tusaale aan cidi ka sarrayn u ahaa halgankii waxbrashda , Intaa ka dib waxa aan ogaaday in sheekooyinkii iga kala go'een oo aanan jawaab u hayn waxyaabo badan oo aan iswaydiiyo oo ku saabsanaa ka gudubka marxaladaha qaar ,run ahaantii waxa nasiib wanaag noqotay in uu aabahay noolaa xilliyadii aqoonta barashadeeda jid adag loo mari jiray oo xiiso leh, dedaal dhab ahina u ahaa astaan .Hiigsiga noloshaas waxa aan ka dhaxlay in cilmiga aan ku dabro dedaal iyo in aan ka dheeraado ku milanka dunidan ku dayashada reer galbeedku astaanta u tahay, sida oo kale aan isku dayo in aan wax uun dunida ku biiriyo oo ay ka mid tahay qoraalka oo isna ka mid ahaa hibooyinka aabo Alle ha u naxariistee.

Wakhti xaadirkan ,waxa si wayn noloshayda u saameeyay oo aan ka dhaxlay isbedel weyn oo hab fikir nolosha ,adkaysiga, dulqaadka, hal abuurka aqoon yahanadan hoos ku xusan ke dib markii aan raad raacay :

- Cali Mustafa Musharrafah_
- Mustafa Maxmuud.
- Maamo Tereesa.

- Ibraahiim Al -Fiqqi.
- Dalaal Abu Qasaala.
- Axmed Al -Shuqayri .
- Axmed Suwail.

5.5. Dadkii Xikmadda Ehelka U Ahaa.

Xikmaddu waa hadal /ficil qiimo badan oo aynu wax ka barano, soo jiidasho leh ,oo aynu kaga gudubno waqtiyada adag ee nolosha.

Hadaba xikmadda waxa laga helaa Qur'aanka kariimka ah

,Sunada nebiga SCW,

ka dib gabayada xikmadda leh.

Xikmadi waa baadida qofka maslimka ah ,meel kasta oo uu ka helo isaga ayaa u xaq leh,dadka soka dood. Sheekooyinka xikmadda ah waa kuwo wax ka bedela hab fikirkeenna oo ina haga si aynu uga fogaanno qoomamo iyo tiiraanyo . Dunida waxa ku nool dad badan oo ka fikira hadalada inta aanay odhan, ka fiirsada falalka inta aanay ku dhaqaaqin , oo aynu raadraacno qaab noleleed kooda waayo aragnimana ka kasbano.

Xikmaddu kaama foga , waxa aad ka helaysaa waalidkaa ,walaalkaa,dadyowga aad la kulanto maalin kasta ,buug aad akhrido IWM, Waxa ay ka dhalataa waqtiga iyo waayaha is daba socda.

Waxa la yidhi qof kasta inta fiican laga qaataa ,xitaa haddii ay daan ahayn isku caqiido, waayo laga yaabaa qof aan caqiido sax ah haysan ,hadana in aad ka aragto fal ku

ralli geliya waayo insaanku ma wada xuma ,mana wada wanaagsana ,sidaa daraadeed muhiim ma aha cidda ay xikmaddu kasoo baxayso ,laakiin waa in aad qaadato adoo ka reebaya wixii caqiidada khilaafsan .

5.6. Xikmado Lasoo Xigtay:

- Hano tiknaloojiyada , laakiin ha u saamixin in ay ku hanato.
- Ha waydiin naftaada inta jeer ee aad dhamaysay Qur'aanka ,laakiin is waydii inta jeer ee aad ku raadowday Qur'aanka.
- Gunaanadka habaynta wakhtigu waxa weeye in aad qabato hawlaha muhiimka ah inta aanay noqon kuwo la degdegsanayo.
- Dhibaatada aad dareento waa masaafada u dhaxaysa waaqicaaga iyo waxa aad dooneyso ,hadaba si aad uga saarto naftaada dhibtaas bedel waaqicaaga ama bedel ama waxa aad doonayso.
- Ku goo geedka warwerka faashka diyaargarowga iyo awoodda talo saarashada Alle SWT.
- Ku dil daalka/quusashda noolaynta ujeedooyin cusub .
- Dareen kastaa waxa uu ku dhisan yahay fikrad ,bedel fikradda waxa is bedeli dareenka.
- Si aad u gaadho darajooyinka sare ,noloshaada ka saar caadooyinka xunxun.
- Guushu waxa ay ku duushaa laba baal : rejo iyo fal.
- Addoomadu waa 3 : mid addoon u ah shahwada jidhkiisa, mid addoon u ah ra'yiga dadka iyo mid

addoon u ah Alle SWT abuuray jidhka iyo dadkaba!.







6.1. Hordhac:

Qeybtan waxa aynu kusoo qaadanaynaa xidhiidhka aynu la leenahay mayeedhaanka.

Run ahaantii, marka ay dadku daryeel helaan ayaa ay jalleeci karaan hareerahooda xayawaanka ku nool ,laakiin mujtamaceenna dadka ayaan loo naxariisan ba , caruur teennu marka ay arkaan bisad ama ey ,degdeg baa ay dhagax u qaataan dabeetana ku tuuraan ,taasina waa caado ay ka barteen bulshada oo cid ka waabisaana ay yartahay.

Hadaba ,waxa aynu u baahanahay in aynu ku tarbiyadayno ubadka in aanay waxyeello u gaysan xayawaanka inala nool ,haddii aanay quudin karin.xaalad kasta ku jir ,hadana naxariista ay kugi leeyihiin xayawaankani waa mid waajib ah ,ajarna aad ku helayso.

6.2. Meeqaamka Xayawaanka.

Mayeedhaanka aynu quudanno iyo kuwa rabaayadda ahba waxa ay xaq inoogu leeyihiin quudin iyo dhibrin,waayo tan iyo waayo badan ka hor iyo bilawgii xadaaradaha ,xayawaanku waxa ay ku lahaayeen nolosha basharka meeqaam gaar ah ,maxaa yeelay waxa ay kula noolaayeen meel kasta oo ay joogaan ,waxa ay u ahaayeen quud ,gaadiid iyo waxyaabo badan oo kale.

Haatanna,waxa meelo badan oo aduunka ka mid ah loo isticmaalaa gaadiid iyo beero falasho, warshadahana waxa ay u isticmaalaan wax soosaarka sida hilibka, caanaha iyo saamahooda intaba.

6.3. Maxaa Ay Inna Fartay Diinteennu?

Diintenna Islaamku waxa ay ina fartay dardaaran weyn oo ku aaddan xayawaanka, tusaale ahaan ,xiitaa marka la gawracayo neefka xoolahaa waxa inala amray in aynu middi afwayn ku gawracno ,si aanay naftu ugu silcin ,taasina waxa ay ina tusaysaa in aan naxariista marna laga tagayn.

QISOOYIN DHEX MARAY XAYAWAANKA IYO DADKA :

6.4. Awrkii U Cawday Nebi Muxammed Scw:

Xadiiska uu soo wariyay cabdullahi bin Jacfar ,waxa uu ku sheegay in isaga oo la socda nebi Muxammed SCW uu awr ilmaynayaa u yimi ,xaga nebiga SCW ayaa uu usoo ololay ,waxa uu ka masaxay nebigu SCW ilmadii ,waxa uu u masaxay dhabarka iyo dhegaha ,dabeeto wuu nastay awrkii , waxa uu nebigu SCW yidhi :Yaa leh awrkan?

Inan ansaari ahaa ayaa yidhi: aniga Rasuulkii Ilaahayoow, dabeeto waxa uu ku yidhi Rasuulku SCW : Alle SWT maa aad kaga baqatid mayeedhaankan uu ku siiyay ,waxa uu iiga cawday in aad gaajaysiiso oo aad daaliso》 》 _abuu daa'uud .

6.5. GABADHII LAGU CADAABAY BISAD AY XIDHAY:

عن عبد الله بن عمر _رضـــي الله عنه _ أن رســول الله _صلّى الله عليه وسلّم قال :عذّبت امرأة في هرّة سجنتها حتى ماتت، فدخلت فيها النّار، لا هي أطعمتها وســقتها إذ حبســتها،ولا هي تركتها تأكل من خشـــاش الأرض 《 》 متّفق عليه.

Xadiiskan waxa uu nebigu SCW inoogu sheegay in gabadhi naarta ku gashay bisad ay xidhay ilaa ay ka dhimatay, waxba may siin markii ay xidhay ,ma ay siidayn si ay risiqeeda u doonato oo xasharaadka dhulka u cunto.

6.6. Gabadhii Jannada Ku Gashay Ey Ay Waraabisay :

عن أبي هريرة _ رضـي الله عنه _ قال :قال رسول الله _صلّى الله عليه وسلّم _ ﴿بينما كلب يطيف بركيّة ،قد كاد يقتله العطش، إذ رأته بغي من بغايا بني إســرئيل ،فنزعت موقها ،فاســتقت لـه بـه ،فســقتـه إيِاه فغفر لها﴾ .متفق عليه.

Xadiiskan waxa uu Rasuulku SCW inoogu sheegaay , in gabadh reer bani israaiil ahayd (sino la iman jirtay) ,loogu danbi dhafay oo ay janada ku gashay ey haraad u dhimanaya oo inta ay kabteedii bixisay ,biyo u dartay ku waraabisay ﴾

Waxa loogu danbi dhafay naxriista ay u muujisay eygaa oo waxa ay garatay in haraadkii iyada hayay ee ay ka cabtay biyaha ,in uu hayo xayawaankanna.

Ogsoonoow, camal yar ayaa ku gelin kara janada .

6.7. MUXAMMED AL-JALIIL IYO BISADO.

Nin suuri ah oo la dhaho Muxammed Al-jaliil ayaa waxa uu furay goob uu ku qaabilo boqolaal bisado ah oo kasoo baxsaday dagaalka ka socday magaalada Xalab iyo hareeraheeda.

Waxa uu sheegay in uu jeclaa bisadaha yaraantiisii, waxa uu furay goob lagu daweeyo bisadaha degaalka ku dhaawacmay markii degenaanshuhu kusoo noqday magaaladaas ,bisadaha uu xanaaneeyo tiradoodu waxa ay gaadhay 200 oo bisadood muddo laga joogo 2011 ilaa hadda.

Yousef





Cutubkan 7aad ,waxa uu gorfayn doonaa xidhiidhka uu INSAANKU la leeyahay ibnu aadan oo idil ,oo koobsan

doona noocyada ay dadku u kala qaybsamaan iyo sida aynu u noqon lahayn kuwo fahansan kala duwanaanta dabeecadaha ,isla markaa saamayn ugu yeelan lahayn bulshadeenna ugu danbaynna uga dheeraan lahayn khilaafaadka iyo dib u dhac ay sabab u tahay dhex galka bulshadu.

Badanaa, inta aynu aragnay qof waxtar leh oo ay saamayn taban ku yeesheen dadka ku xeerani oo la tiicaya tiiraanyo iyo dib u dhac,badaanaa inta ka cabanaysa hebal ayaa dulmi igula kacay.Waxa aan aaminsanahay in haddii ay dadku si fiican u fahmaan nolosha ,ka tirsanaanta bulshada ,iyo habka loola dhaqmo noocyada kala duwan ee dadka in geedigeennu aad u sahlanaan lahaa,dhamaan teenna saamayn kaga tagi lahayn dunidan.

Hadaba,dabeecadaha dadku waa milyanno nooc oo kala duwan, si kala duwanna culimadu waa ay u tilmaamaan ,tiro lagusoo koobay ma jirto, marka aad sii dhex gasho waxa aad arkaysaa waxyaabo la yaab leh oo qaarkood kusoo jiitaan ,kuwa kalena aad ka dido.Ha ilaabin adiga na qof baad raalli gelinaysaa ,halka ku kale kula yaabanyahay ,waa duni cid kasta isu aragto in ay ugu fiican tahay oo aan cid kalena cajabin.

Hadaba, asal ka dadku waa wanaag, laakiin deegaanka uu qofku ku noolyahay iyo dhacdooyinka noloshiisa ayaa qaabeeya dhaqankiisa oo ka dhiga hadba sida ay yihiin.

Waxa aad la kulantaa qof aadan waxba u qaban oo Alle SWT dartii kuu jecel ,taa lidkeeda waxa aad la kulantaa qof aadan dhibaato u gaysan oo dunida kuugu neceb,sidaa darteed waxa inala gudboon sabir iyo dulqaad aynu kaga gudubno dhacdooyinka dunidan.

Dhamaan dadku waxa ay hoos joogaan oo ay rajaynayaan naxariista iyo nimcooyinka Alle SWT, dadku waa ayo? Waa adiga oo kale, waa in aynu ku faraxno tallaabada wanaagsan ee kuwa inaga mid ahi qaadaan ,maxaa yeelay waa ay ina dhiiri gelinaysaa sida oo kale waa wax qabad ibnu aaadan oo ina matalaya . Si aanad nusqaan u dareemin waa in aad mar walba kobciso aragtidaada ,dabadeeto waxa aad gaadhi heer aad raalli ku noqoto.

Dhamaanteen waxa aynu xaq u leenahay, in aynu noqonno kuwo saamayn dunida ku yeesha, kalsooni leh,asxaab fiican leh oo nolol fiican oo degenaansho ku noolaada.

Aayadan Qur'aanka , waxa koobsanaysaa sida loola dhaqmo dadka oo ah: "saamax gafka, wanaagga far ,iskana dhaaf oo haku celin sharkooda mid la mid ah kuwa dulmiga iyo jahliga u ehelka ah"

7.2. Tilmaamo Wanaagsan Oo Dadka Lagula Dhaqmo

Gabayaa carbeed ayaa waxa uu yidhi : " u samo fal dadka ,quluubtooda ayaa aad adoonsan doontaa" , oo micneheedu yahay way ku jeclaan doonaan.

Qodobadan hoos ku qoran waa dariiqa aad u marayso xidhiidh wanaagsan oo aa aad dadka la yeelato:

- Kulanka ugu horeeya ee aad la yeelato dadka ,kala hadal waxa aad wadaagtaan ,si degenna u hadal.
- Isku day in aad fahamto waxyaabaha ay jecelyihiin,si aad ula wadaagto dhanka ay u leexdaan/jecelyihiin.
- Hadalkaagu ha noqdo mid aad ka fiirsatay oo soo jiidasho leh ,qaylana ka dheer.
- La jeclow dadka waxa aad naftaada la jeceshahay si aad u kasbato.
- Hadalkaagu ha ahaado mid iskii u imaadda oo aan is kalifaad ku iman.
- Ku caawi dadka waxa aad awooddo.
- Ka fogoow hadal badni iyo isku dir.
- Ahow qof dhoolo cadayn badan, oo dhanka fiican waxka eega.
- Ahow qof isku kalsoon oo hanweyn.
- Ilaali dareenka dadka kale,haddii aadan farxad gelinayn ,ha u sababin wax dhaawaca.
- La wadaag farxad,murugo IWM.
- Haku qasbin dadka in ay kula rafiiqaan/jeclaadaan.
- Xakamee xaaladaada oo isbedbedelka ka ilaali.
- Qurxi oo habee muuqaalkaaga.
- Rumee waxa aad hiigsanayso oo muuji awoodahaaga.
- Arimahaaga qaarkood hakuu qarsoonaadaan.
- Ka tirsanow deegaanka aad asxaab ka la saaxiibi karto:
- Ka qeyb qaado kulamada waxqabad ka.

●Ahow qof bulshaawi ah oo dhexgala waxqabadka maalin laha ah.

●Xubin ka noqo munaasabadaha ka dhaca deegaankaaga.

●Ku biir jimciyadaha lagu falanqeeyo waxyaabaha aad xiisayso.

● Ka qeyb qaado barnaamijyada caawinta dadka tabaalaysan.

●Ha joojin barashda cilmiga.

●Saaxiibka ugu wanaagsan kaama foga ,waa ehelkaa.

●Dareensii dadka qiimahooda.

●Isku day in aad ka yarayso dadka culayska nafsiyeed.

●Ilaali dhaqanka wanaagsan meel kasta oo aad joogto.

Ma qoslaysaa imika ,maxaa yeelay waxa aad aragtahay tilmaamahaagii oo meesha ku qoran?

7.3. Sidee Baa Saamayn Loogu Yeeshaa Dadka.

Kalsoonidu waa sababta ugu muhiimsan ee keenta in aad saamayn yeelato, hadaba qodobadan hoos ku xusan ayaa iyaguna ka mid ah siyaabaha saamaynta loo yeesho:

- Ixtiraam dadka.
- Xaal kasta oo aad ku sugantahay muuji farxad.
- Xidhiidh wax ku ool ah la yeelo dadka.
- Kaga soocnow dadka hab fikir wanaagsan iyo dedaal.
- Waani dadka adiga oo aan u sheeganayn awoodahaaga.

- Ka saahid waxa dadka gacantooda ku jira.
- Amaan dadka oo u qir dheeraadka ay kugu leeyihiin

7.4. Qaabkee Ayaa Aad Jeceshahay In Lagugu Tilmaamo.

Inkasta oo dunidan ku sugnayn qof dhamaystiran ,hadana ma jiro qof wada xun ,laakiin mid kastaa wuxu yeelanayaa tilmaantiisa xoogga badan ,tilmaan ku lid ah oo ku qarsoon naftiisa,soona muuqata xilliyada kala duwan.

Saamayn toos ah iyo mid dadban ayaa ay kugu leeyihiin waalidkaa,asxaabtaadu, iyo bulshada intaa ka sii baxsan ,taa mid la mid ah ayaa aad adiguna ku leedahay inta dad ah ee aad saamayso ee aad la wadaagto wakhti iyo nolol.Sidaa darteed dooro asxaab ku anfacda , isla markaa dooro kanaal kasta oo saamayn kaasoo gaadhayso oo ha noqdaan kuwa wanaagga kugu beera ,xumaanna kaa fogeeya .aqoon waa saaxiibka ugu wanaagsan ee aad la rafiiqdo!!!!!!!

Ha noqon qof nugul oo waxyeelooyinku ka xijaabaan nolosha iftiinkeeda,lama diidana in aad damqato ,laakiin ka dhigo dhibaatada dhiirigeliye kuu hor seeda nolosha aad doonayso,waayo waxa la ogaaday dhamaan dadka dunidan saamayn ku yeeshay in la noolaayeen dhibaato ,dabeeto ay ka barteen casharo sallaan u noqday guushooda.

Ogsoonow in mar walba ay jiraan dad kaa dhibaato badan oo aad u noqoneyso fay ,markasta oo aad is tidhaa waxa aad ku sugantay khatar aan lagasoo waaqsan karin.Dib u baadh oo akhri nolosha dadka guulaystay ,waxa ay kuu

noqonayaan daawo ,waxa ay kugu riixayaan in aad adna samayntaadii degdeg u bilawdo.

Haku dagmin nimcada aad haysato , goor aadan filayn baa ay tegi kartaa ,laakiin waxa aad ku joojin kartaa mahadnaq. Ha ku kaaftoomin xirfad nololeed ,is cusboonaysii ,is kobci oo ka ilaali daadkaagu in uu meeluun fadhiisto.

UGU DANBAYN DOORASHADA ADAA LEHE ,DOORO QAABKA AAD DOONAYSID IN LAGUGU TILMAAMO /XUSUUSTO.

7.5. Ha Noqon Milme ,Laakiin Noqo Mile Khayr.

Umadaha muslimiinta ah waxa ku dhacay musiibo xaga fikirka kasoo gaadhay ,galbeedka kaga ma daydaan dedaalka ay ugu jiraan cilmiga ,waxsoo kordhinta, laakiin waxa ay ku daydaan kuwooda ugu liita oo markii la ogaaday in ay dadku isku daydaan loo bixiyay " xidigo" , si loo hiigsado xidigahaana waa in la sameeyo waxa ay sameeyaan .

Bal u fiirso dadka haya xilalka rasmiga ah waxa ay xidhanyiin maryo hagaagsan oo aanay ku jirin wax aad la yaabto , halka kuwan la leeyahay waa xidigo ay xidhan yihiin wax aad la yaabto, haddii ay xidigo yihiin iyaga ayaa ku dayan lahaa!!!

Filin mooyee ,miyaa aad aragtay iyaga oo inala wadaagaya jaamacadaha cilmiga iyo baadhistu ka

socdaan ,waa maya ,waayo in aad ku dayato ayaa laguu diidayaa !!!

Taa waxa aan uga socdaa ku dayo wixii khayr leh , dooro cidda aad ku dayanayso , iska jooji wixii aan ku aanfacayn ,ha qaadan wax kasta ,ee ka fikir oo ka falceli haa iyo maya labadaba.

Waxa aad tahay Insaan karaamo leh , ha noqon mid erey kasta run mooda ,ee ahow mid xooggan oo wax is waydiinaya , ha noqon mid dabayluhu hadba meel u tuuraan. Haddii aynu nahay soomaali waxa aynu ku sugan nahay nimco waayo waxa aynu nahay uma muslim ah ,sidaa daareed ku dhaqan diintaada , diini waa hab nololeed,Islaamna waa haabka ugu wanagsan ee loo noolaado.

7.6. Halganka Nolosha Ee Uu Ku Jiro Insaan Dhab Ahi Waa Hubaal In Uu La Kulmi Dadyowgan Hoos Ku Xusan :

Kuwo libinta kula jecel:

Nimco weyn ayay tahay haddii lagugu galladaystay dad libinta kula jecel ,dadka noocan ahi waxa ay ogyihiin in dhamaanteen aynu leenahay baahiyo isku mid ah ,helitaankeeduna yahay lagama maarmaan ,waxa ay la jecel yihiin dadka waxa ay naftooda la jecel yihiin .Tusaale ahaan macalin, waayeel, iyo qof wanaagsan oo meel uun ku kulantaan dunida.

Kuwo kaaga ogaal badan noloshaada:

Waa qayb dadka ka mid ah oo wakhtigooda ku dayaca nolosha dadka kale ,fikirkaaga, goobaha aad joogto,waxa aad xidhan tahay , guulahaaga intaba gaadh bay ka hayaan,marka aynu la kulanana waxa ay inagu dhibaan warar badan oo ay inaga hayaan.Waxa aan u fahmay muraadkooda in ay jecelyihiin shakhsiyadaada oo ay rabaan in uu dhan walba kaala socdo si uu kuu matalo.

Aamusaneyaal:

Dadkan lama fahmo ,waxa ay kaa aaminsanyihiin ma garan kartid ,laga yaabaa in ay wanaag kuu hayaan ,laakiin aanay kusoo gaadhsiin karin ,laakiin waxa ay u dhowdahay colaad qarsoon! Farxad iyo murugo kolba taad ku sugan tahay kama fal celiyaan ,waxa ay kaala socdaan dusha uun.

Laga yaabaa in ay yihiin dad wakhtiga aad wadaagtaan / meel wada joogtaan.

Kuwo u arka horumarkaaga duullaan ku yimi

Dadkaa qaar ayaa heerka ay iyagu nolosha ka gaadheen aan ogolayn in cidkale kor marto, dabeeto waxa ay kaala degaalamayaan dhinac kasta ,waayo geedigaaga waxa ay u arkaan duullaan iyaga ku yimi. Waa hab fikir qaldan waayo waa la gaadhi karaa,lana dhaafi karaa heerkooda.

Waxa ka maqan fikirkooda in qof kastaa yahay gaar ,ka baxsan noloshooda gebi ahaanba oo himiladiisa iyo doonitaankiisu gaar u yihiin.

Haddii sidaa la aamino waxa meesha ka baxaya fikirkaa qaldan.

Tusaale ahaan dad ka mida kuwa inaga heerka sarreeya.

Kuwo kuu muujiya wanaag laakiin…….

Badanaa inta qof aad saaxiib la noqoto ,walaalkaa aad ka dhigato iyo garab aadan ka maarmin aad waqti kedib ogaatay in uu dadka kuugu necbaa ,goobtaad ka maqantayna aayahaad ku aamintay gudbiya oo aftahan iskaga dhiga dad kale.Tusaale ahaan, dad aadan aqoon badan u lahayn oo aad noloshaada ku darto adiga oo aan iska hubsan.

Kuwo kuula rafiiqa si ay xog kaaga helaan!!

Dadka waxa ka mid ah kuwo iyagu xidhiidh waara kaa doonayn ,laakiin kula rafiiqa muddo kooban xog ay noloshooda ku wanaajiyaan baadhitaankeeda awgeed . Haddii aad tahay qof qalbi cad ,waxba haku degmin qofkasta oo aad aragtid , hana odhan waa saaxiibkay ilaa uu kaala gudbo waayaha dunidan.Tusaale ahaan dadka heer aad gaadhay idin kulmiyo.

Kuwo isku daya in ay ku maamulaan!

Dadka noocan ah muhiim lama aha doonitaankaagu ,laakiin waxa ay arkaan oo keliya waxa ay kaaga baahan yihiin.Go’aamada aad u qaadanayso waxa ay u arkaan khasaare, maxaa yeelay waxa ay moodayaan in ay kaaga

war roon yihiin noloshaada gaarka ah ,kuuma cudur daaraa,taasina waxa ay keentaa in aynu ka fogaanno.

7.7. Noocyada Dadka -Cilmi Nafsi.

Waxa la sheegay in shakhsiyadda dadka ay 5 qodob saameeyaan : Deegaanka, garashada,habla dhaqanka, caafimaadka iyo mooralka.

Dhinacyo badan ayaa laga istaagaa marka la qeybinayo dabeecadaha dadka . Waxa jira dad iyagu u taagan mar walba in ay wax wanaajiyaan,kuwo daneeya is kaashiga, kuwo ku dhiiri geliya dadka waxyaabaha fiican ee ay qabtaan ,kuwo kalgacal badan, kuwo fikira, kuwo shaki badan, kuwo hogaanka ku fiican, kuwo xamaasad ka buuxdo , kuwo nabadda jecel ,kuwo mucaarid ah , iyo aad u degan .

Waxa kale oo jira kuwo kelida jecel oo aan dadka dhex galin, kuwo furfuran, kuwa arimaha ku talax taga, kuwo isla saxsan mar walba , kuwo niyad jabsan iyo kuwo aan naxariis lahayn.

Tilmaamhan waxa lagu arkay dadka ,dabeeto waa la qoray:

Qof kalgacal badan;

Tilmaamahiisa:

- degen,weji furan.
- dadka ku kalsoon ,naftiisana ku kalsoon.
- awood u leh in uu dhegaysto dadka kale.

• qalbi wanaagsan oo soo dhaweeya dadka.

•marwalba khayrka uu ku jiro og oo ku mahad naqa.

•ceebtiisa: waqtiga ma qiimeeyo ,xilliga lala ballamayna wuu kasoo daahaa.

SIDA LOOLA DHAQMO:

Uqaabil si ixtiraam leh oo u dhegayso , haka bixin qodabka aad ka hadlaysaan, wakhtiga uu kuu baahan yahay la qabo baahidiisa ,ugu danbayn fahansii muhiimadda waqtiga.

Qof dabeecad adag:

Tilmaamahiisa:

• Waa uu ku adagyay habla dhaqanka naftiisa iyo dadkaba.

•Is Kuma dayo fahanka dareenka dadka kale.

•Waa mid hadalka ku badh jara dadka.

•Waa qof dood jecel, oo isla hanwayn.

SIDA LOOLA DHAQMO :

Isku day in aad is dejiso, iska hubso in aad diyaar u tahay la dhaqankiisa, kula dood kalmado wanaagsan ,fahansii muhiimadda ixtiraamka.

- ***Qof go'aan lahayn :***

Tilmaamahiisa:

•Kalsooni darro, qajilaad iyo warwer badan ,waxa ku adag go'aan qaadashada ,waxa uu ina waydiiyaa xog badan ,waxa uu ku dedaalaa hubsiimo.

SIDA LOOLA DHAQMO:

Isku day in aad kalsooni barto, oo aad ka yarayso warwerka , ka caawi go'aan qaadashada una sheeg in qofka lagu ixtiraamo go'aan qaadashadiisa.

- ***Qof qabow oo habsan badan :***

Tilmaamahiisa:

•lama fahmo.

•waa qof awood u leh in uu ku dhegaysto.

•kama soo horjeesto fikrada la soo bandhigo.

•waa uu ka baxsadaa su'aalaha.

•ma aha bulshaawi.

SIDA LOOLA DHAQMO:

U muuji ixtiraam, ula dhaqan sida uu yahay ,haka degdegin ,ka sug jawaabta, waydii su' aalo jawaab toodu waqti qaadaneyso.

- ***Qof hadal badan :***

Tilmaamohiisa:

Hadal badan, muhiim ayaa uu isu arkaa, jecel in uu iska wayneeyo dadka kale, ku dhaca qaladyo badan, ka baxa qodabka laga hadlayo.

SIDA LOOLA DHAQMO:

Fahansii qiimaha waqtiga, dareensii in aadan raalli ku ahayn qodabka oo laga baxo.

- Qof mucaarid ah goor kasta

Til:

Kalsooni darro, ma tixgeliyo dadka kale, kuma dhiiradu fikrado cusub, ma galo tijaabooyinka ,waayo waxa uu ka baqaa in uu ku fashilmo.

SIDA LOOLA DHAQMO:

Fahan dhanka uu hadalka ka eegayo, ku taageer aragtidaada daliillo xoojinaya, sabir u yeelo la dhaqankiisa,isticmaal haaa…..laakiin.

- ***Qof sheeganaya aqoon:***

Tilm:

Ma rumaysto dadka kale ,Isla wayn, xakamaynta jecel iyo dheedheelka , madax adag ,diidmo badan, ku adag aragtidiisa, ku faana kana sheekeeya naftiisa, shaki badan ,isku daya xiitaa inuu kaaga waramo shaqadaada.

SIDA LOOLA DHAQMO :

Haku fikirin in aad ka aargoosato, isticmaal haa ….laakiin,ilaali degenaantaada, aqabal aragtidiisa ,soo bandhig aragtidaada.

- ***Qof qajilaad badan:***

Tilm:

Kalsooni darro, waxa sahlan in laga shakisiiyo, dhowrsoon,si sahlan loo saamayn karaa, wuxu ku daba dhuuntaa dadka kale, waxa uu ku khasaaraa waxyaabo badan oo noloshiisa ah.

SIDA LOOLA DHAQMO:

Waydii aragtidiisa, u sheeg in xogta uu hayo awood u tahay, ku beer kalsooni , ha u bandhigin waxyaabo uu kala doorto , laakiin u fuli waxa uu u baahanyay.

- ***Caniid ah :***

Tilm:

Waxa uu is dhaafiyaa aragtida dadka kale, mana rabo in uu ku dhegaysto,waxa uu diidaa xaqiiqada jirta ,si uu u muujiyo heerka madax adaygiisa, mana ixtiraamo dadka kale.

SIDA LOOLA DHAQMO:

La dood adiga oo doodda ka qaybgelinaya dadka kale ,kana dalab inuu ixtiraamo aragtiyaha kale, isticmaal haa …laakiin ,una sheeg in aad aragtidiisa baadhi doonto.

- Qof dhanka wanaagsan wax ka eega/ yididiilo leh

Tilm:

Aragti macquul ah, maskax badan, xiise badan, jecel natiijada camalkiisa, dood wacan, soo bandhiga su'aalo waxku ool ah, wax u diida si toosan, si wanaagsan wax u dhegaysta, si degen oo caqliyaysan u qaata go'aamada .

SIDA LOOLA DHAQMO:

Kula hadal aragti macquul ah , ula hadal si kala danbeysa, aqbal aragtidiisa, daacad u noqo.

- ***Qof dadka iska Saraysiiya :***

Tilm:

Waxa uu aaminsanyahay, in uu ku suganyahay meel aanu u qalmin, waxa uu uruuriyaa gafafka dadka kale si uu ugu dhawaco,waxa uu ula dhaqmaa dadka sidii oo uu ka sareeyo.

SIDA LOOLA DHAQMO:

Ha waydiin su'aal toos ah ,isticmaal haa …..laakiin.

- ***Qof su'aalo badan:***

Tilm:

Waa qof doonitaan badan oo kugu dhiba dalabaadkiisa,waxa adag sida uu inoola dhaqmo.

SIDA LOOLA DHAQMO:

DIB U DHIG DALABKIISA SI AAD U HESHO JAWAAB AAD KU QANCISO.

- ***Qof baadha qafafka dadka***

Tilm:

Ma ixtiraamo dadka, waxa uu uruuriyaa gafafka, badanaa waxa u diyaara su'aalo.

SIDA LOOLA DHAQMO:

Fahansii in qof kasta oo inaga mid ahi leeyahay xad aanuu soo dhaafi karin ,ha siinin fursad uu kugu xukumo,isticmaal haa …laakiin.

- ***Qof cabasho badan:***

Tim:

Marka aad waydiiso arin,waxa uu ka sheekeeyaa noloshiisa oo dhan.

SIDA LOOLA DHAQMO:

SI FIICAN U DHEGAYSO ,bar sida uu u noqon karo qof adkaysi badan oo dhanka fiican waxka eega.

Ma heshay qofka aad tahay? Ma u malaysay in aad dhowr qof oo kala duwan mid walba tahay ? Ka aad tahay ba is aqbal oo isa sax ,isna horumari !!!!!!!!!!!!!!!

Tix: Mawdoo3.com_ انواع الشخصيات

WEYDIIMO:
Sidee ayaa uu yahay xidhiidhka aad la leedahay Rabbi SWT?

B] Xidhiidh leh xidido gaamuray.
T] Xidhiidh fiican laakiin u baahan xoojin.
J] Xidhiidh laciif ah oo murugo igu haya.

Ma dooneysaa in aad wanaajiso xidhiidhkaas ?

B] Haa ,Waa in aan ku faro adeygo .
T] Waa waa jib maxaa yeelay waxa aan ogahay in uu yahay laciif .

Waa tee cibaadada aad ka gaabisay?
B] Salaadda.
T] Soonka.
J] Raacdada Rasuulka SCW.
X] Sakada .
Kh]Xajka.
D] Cafinta dadka.
R] Midna.

Sidee ayaa uu yahay xidhiidhka aad la leedahay Waalidkaa ?

B] Fiican .
T] Xoojin u baahan.
J] Laciif ah.

Ma dooneysaa in aad wanaajiso xidhiidhkaas?

B] Haa, waan in aa ilaaliyo.
T] Haa ,waa igu waajib .

Sidee ayaa aad u maleynaysaa in ay wanaajineyso xidhiidhkaas?

B] In aan u dhibriyo hadalka.
T] In aan wakhti la qaato .
J] In aan weydiisto cafis .

Sidee ayaa uu yahay xidhiidhka aad la leedahay naftaadu?
B] fiican .
T] Weli kama fikirin.
J] Laciif .

Ma dooneysaa in aad wanaajiso xidhiidhka naftaada?

B] Haa, waa in aan joogteeyo.
T] Waa in aan aan ogaado heerkiisa.

X] Haa ,waa waajib in aan xoojiyaaa.

Dooro talaabada ugu wanaagsan ee aad ku wanaajin karto xidhiidhkaas.

B] In aan aqbalo meelaha aan ku liito kobciyana .
T] In aan daacad u noqdo .
J] In aan had iyo jeer u sheego gaabiskeeda.

Sidee ayaa uu yahay xidhiidhka aad la leedahay asxaabtaada?

B] Aad u fiican .
T] Liita .
J] Ma lihi asxaab.

Ma jeceshahay in aad wanaajiso xidhiidhkaas ?

B] Haa, waa in aan joogteeyo.
T] Haa / Maya ,uma qalmaan.
J] Waa in aan asxaab yeesho.

Talaabadee baa aad u malayneysaa in ay wanaajin doonto xidhiidhkaas?

B] Run sheeg/ Daacadnimo .
T] Dul- qaad .

Falalkaaga maka dhadhamisaa axaadiista Rasuulka NNKH?
B] Haa.
T] Maya.

Waa ayo dadyowga aad ku dayato ? Dooro hal jawaab wax ka badan.

B] Nebiyadii / Dadkii wanaagsanaa .
T] Aqoon- yahan .
J] Dadka caanka ah .

Maxaa aad ku dooratay ? Dooro hal jawaab wax ka badan .
B] ku dayshadoodu waa dariiq lagu badbaado.
T] Waxa aan ka helaa dhiiri gelin.
J] Si aan ula mid noqdo .

Ma aaminsantahay in Mayeedhaanka aynu xidhiidh la leenahay?
B] Haa .
T] Maya .

Aragtidaada Waa sidee fikrada ay dadkeenu ka qabaan mayeedhaanka?

B] Kama fikiraan baahidooda .
T] Ma haleelaan in ay ka fikiraan.

Ka dib markii aad akhriday cutubka ku saabsan ,fikirkaaga maxaa iska bedelay?

B] In aan u naxariisto / quudiyo.
T] In aan rabeeyo.

Dadku maxaa ay xaq kuugu leeyihiin?

B] In afkeyga iyo adinkeyga ay ka badbaadaan.
T] In aan ula dhaqmo sida ugu wanaagsan.

Waa maxay xukunka aad kula dhaqanto dadku?

B]Niyad fiican oo ay weheliso digtoonaan.
T] Niyad fiican.

Maxaa aad ka fishaa Dadka ?

B] Waxba.
T] Wanaag .
J] Dhibaato .

Yousef